# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

**Opened: - 10:29 AM** **Hansard No.21/6** **Kal-fadhiga 21[aad]**

**Fadhiyadii 15,16 iyo 17[aad]** ***25-26-27/05/2013***

***Dooda Xeerka Bileyeska Akhriska 2[aad] waxaa ka qeybqaatey 19 Mudane waxayna socotay 3 maalmood.***

**Gudoomiye Md. C/raxman Maxamed C/laahi (Cirro):-** sideynu u balansanayan waxaa manta bilaabaynaa dooda Xeerka Bileysak oo Mudanayaashu hore isu qoreen, sidaa darted waxaan ku soo dhoweynayaa:-

## ***Dooda Mudayanaasha ee Xeerka Booliiska Akhriska 2[aad]***

1. **Md. C/kariim Aw Cali Shabeel:**- Mudanayaal aniga aragtideyda horta gudida soo sameysay waan u mahadnaqayaa, markii aan akhriyay waxaa iiga soo dhex baxay in lagu soo daalay oo laga soo shaqeeyay inta badan qodobadiisuna way dhameystiranyihiin, sideynu ognahay meelaha ugu waaweyn ee cadaaladu ka fusho booliiska ayaa ka mida sababtoo ah sidaad ka warqabtaan waxay gacanta ku hayaan dadkii faldambiyada gala ama wax sameeya oo dhibaato geysta oo iyagaa maxkamada ugudbiya, hadaanan cadaaladeeda la sugin oo booliisku si cadaalada u handlegareyn dhibaatadeeda waadgaraneysaan.

   Waxaan kaliya oo doonayaa inaan is dultaagno Saldhigyada Booliisku inaanay kala xadeysnayn oo aanay lahayn meelo lagu kala xidho qofka under-ageka ah iyo dadka waaweyn oo la isku dhex xidho, taas oo ah aduunka oo dhan arrin ka reeban oo saldhigyo kala gaara lagu kala xidho oo ay leeyihiin, maxaabiista saldhigyada lagu xidhayo mudada kooban waxaan soo jeedinayaa in xeerka wax laga soo daro oo aan dad yar yar oo caruura iyo dadwaaweyn aan isku meel lagu xidhin.

   Waxaa kaloo jira saldhigyada Gobolada iyo magaalooyinka waaweyn aanay lahayn meelo lagu xidho dumarka oo aad arkeyso iyagoo meel banaanka ah loo goglayo, taasna waxaan soo jeedinayaa in xeerka lagu soo daro.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Xeerkani intii loo baahnaa wuu xambaarsanyahay, marka mudanayaashu ka doodaan ee wixii laga badalayo laga badalo la ansixiiyo.

2. **Md. Xuseen Ismaaciil Yuusuf:-** Gudoomiyaha, Xildhibaanada iyo dadka Golaha fadhiya waan idin salaamayaa, sida Xidlhabaanku sheegay xeerku waa xeer wanaagsan Gudidiina si fiican bay uga soo shaqeeyeen iyana waay mahadsanyihiin, Xeerarkan inaga baxaya waxaan jeclahay in la saxo oo ninwalba wuxuu ku darikaro ku daro.

   Kalmada Booliis waa kalmada ingriisa markaa waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo “Bileys” oo afsomali ah, **Qodobka 1aad** ee erey bixinta, “Sarkaal” waxaan jeclaa in lagu daro “oo darajo leh”, waayo sadarka ka hooseeya ee “Askari” waxaa la yidhi xubinta Ciidanka bileyska ah oo aan darajo lahay.

   **Qodobka 12aad F/1aad Xarafka (G)** waxay u baahantahay in dib u habeyn lagu sameeyo oo laga dhigo “Waxaa lala socodsiinayaa Awooda la xidhiidha Dalacaada Ciidanka Bileyska Wasiirka Arrimaha Gudaha”

   **Qodobka 13aad** ee Cabashooyinka laga soo cabanayo Ciidanka bileyska waxay u baahantahay in la cadeeyo waxay tahay ma dilbaa, Ma boobaa ma Kufsibaa, waa in la Xadido oo Xeerka Nooca Cabashada ileyn cidkasta way ka cabankartaa oo kii fadhiistay baa ka cabankaree, halkan waxaa ku taal internal controlka intee ayay Go’aan ku gaadhi karaan, maaha iney sanad iyo haystaane waxaan soo jeedinayaa in “**2 Wiig laga dhigo”** oo open ended yaanay noqon.

   **Qodobka 14aad F/4aad** iyana waa in laga saaro **“iyo”** oo ha la yidhaahdo “si waafaqsan Xeerarka Dalka” Qodobka 15aad F/1aad sidey u qoran tahay baa yara fiicnayn markaa dibaan u qoray halka ugu dambeysa oo waxaan u dhigay **“iyaga oo adeegsanaya Xeerkan iyo Xeerarka kale ee dalka”**

   **Qodobka 18aad F/2aad** sidey u qoran tahay iyana dib ha loo habeeyo luuqada ay ku qorantahay ayaa si mugdi ah hadalkuna ma wada socdo**, F/4aad** marka taliyuhu askari saman u dirayo ee dhageysanayo askari eedaysane ah isagu ma maxkamad ciidan buu fadhiyaa, haday tahay Maxkamad ciidan fadhiyo muxuu kaga duwanyahay qolada dacwada qaadeysa, waxaan soo jeedinayaa in Gudidda Golaha looga dhigay Gudoomiyaha in taliyahan ciidanka Gudoomiye looga dhigo si aan laba jeer loo dhageysan oo marna taliyuhu dhageysan marna Gudidu.

**Qodobka 19aad** Cinwaanka waxaan soo jeedinaya in dib loo habeeyo oo laga dhigo **"reebnaanta iyo anshaxmarinta dambiyada ka dhanka ah bani aadanimada"** hakii "mamnuucida" ku qorantahay, **F/3aad** Halka 10-25 sano markaa waxaan odhan lahaa **"1-2 sanadood marlabaad haduu galo in shaqadaba laga fadhiisiyo",** Cinwaanka **Qodobka 19aad** ee hore Cinwaankiisa waa in laga dhigaa "Magacaabista, Waajibaadka iyo awoodaha Taliyaha Ciidanka bileyska" oo ah in la isweydaariyo uun sidey u qorantahay

**Qodobka 39aad F/6aad** waxaan ka badalay (Ciidanka booliisku masuul ayuu ka noqonayaa) halkaa sidey u qorantahay baan wax ka badalayaa oo aan u qoray ***"Ciidanka Masuul kama noqon karo dhibaato keentay dhimasho iyo dhaawac kana dhalatay ka hortag maxaabiis baxsanaysaa ama dambiile cadaalada ka baxsanaya ama dad gadoodsan oo is dilaya oo la kala joojinayo ama kacdoon aan sharcigu ogoley ha noqdee".***

3. **Md. C/raxman Yuusuf Cartan:-** Dhamaan waad salaamantihiin horta way adan tahay bil xaqiiqa Xeer dhinac farso ka ah oo ciidan qaabilsan,gudidi way soo dadaashay hase yeeshee mar kaad in dhaha aad mariso waxaa arkaysaa wax yaalo badan oo ay ka mid yiihin eray bixinta oo kale waxyaabo yar yar oo basiida oo aan eray bixin aan noqonayn waxaana ka mid ah, waax iyo qayb waa talis ciidan oo heer gobol ah waax waa ciidan xirfad gaar ah leh, markaa waxaa ku jira ciidan rayida oo aanan fahan sanayn waxa loo la jedde anan wax raiyada aanaan ka haysan waana terminology soo baxay ilaa taa la fahmana way adkaanaysaa in taa la mab da'eeda la fuliyo, civil police waxaasi waa waxyaabi iska basidda.

   Waxaana laga guurayaa boolis dadka afduuba jujuubana oo xaquuqda dadka jabiya amar ku taagleeya waxaana loo guurayaa booliis loo taba baray qaab rayida ayaa loo bahan yahay.

   Booliss rayida maxaa loo la jeeda ilaa eraygaa la fasiraa loo bahan yahay eraygaasina completely waa uu ka maqan yahay hadii aan la fasirina waxaa uu noqonayaa haadaa bayna haadaa.

   Markaa waa in aan hagaajino oo aan cadayno muxuu yahay boolis rayid ahi waa ta labaade arinta u baahan in wax aan ka qabano ee afsoomaaliga cajiibka ku darsatay waa MUDnaan markaa mudnaan waxaa u is ticmaalaanaa waa priority markaa waa in loo raadiyaa eray kale oo milatari oo ku haboon, waxaa kale oo jirta MUTAYSI oo malaha

ay u jeedaaan merit iyada qudheedu way kaga haboontahay tii hore markaa iyada lafteeda waa in loo baadhaa oo mid ku haboon loo raadiyo

Waxaa kale oo iyana ku jirta HAKIN suspension taas lafdeeda waxaad moodaa in aanu erayu eraygii ahayn, waxaa kale oo jirta erayga u QAlAN in kastoo oo aanu ahay sax in erayadaa oo dhan la is dultaago ayay u bahan tahay

Waxaa kale oo meesha ka maqan mabaadii'da booliiska hagaysa ayaa ka maqan meesha oo inta aynaan u daadagin xeerka waa maxay mabaadiida haygaysa Booliiska Somaliland maxay tahay? Oo aan eegno xidhiidh ka uu la leeyahay dadweynaha aan eegno waxaan loo bahan yahay laba bayj oo preamble ah oo ka hadlaysa mabaadiida waa in lagu daro ayay ila tahay.

**Qodobka 2aad iyo Qodobka 3aad** iyo qaar kale waxaa ka maqan wixii hordhaca iyo mabaadiida in lagu daro ayay ila tahay,halkan waxaa ku taala qaab dhismeedka  waxaa kale oo aan halkan ku dari lahaa Qodobka 3aad qaab dhismeedka iyo waa jibaadka ciidan booliska qodobkaasi waxaa uu qorayaa waajibaadka iyo masuuliyadu waa isu mid markaa waxaan odhan lahaa in qodobadaas oo dhan preamble ka ayaan ku dari lahaa.

**Qodobka 5aad** waxaan uu ka hadlayaa dhex dhaxaad nimada Boliska Somaliland markaa maahan in uu noqdo ayaa ku haboon

**Qodobka 13aad** waxaa ku qoran **F/2aad** waxaa ku qoran hadii cabashada wax ka qaban waayo boolisku ama cidii cabanaysay ay ku qanci weydo jawaabta dacwada booliisku qaaday, waxay dacwadaa u gudbinaysaa Wasaarada Arimaha Gudaha oo samayn doonta xafiis qaabilsan dacwadaha. Xeerkan waxaa haboon in lagu qoro strature ka in ay saldhigyada ama xarumaha ay yeelataa meel dacwadaha qabata tusaale ahaan qofka jooga Sanaag ma waxa uu u imanayaa wasiir ma fiicna sidaasi ee waa inuu yeshaa xafiis.

Waxaa kale oo jirta **Qodobka 17aad** dhanka anshax marinta waxaa soo saaraya xeernidaamiye ayaa la leeyahay maraa waa in ay ku jirtaa xeerka xafiiska Anshax marinta saraakiisha ciidanka bilaysku ee qoldanta isla **Qodobka 17aad f/4aad** waxaa ku qoran in ay xubin ka

noqdaan xisbiyo siyaasadeed waxaa kale oo habon in ay ku jirto farqado diimeed, kuwa qabyaaladeed, kuwo gaarahaaneed waa in ku jiraan.

**Qodobka 18aad** qaabdhismeedka guud waxaa uga hadlay si guud waxaa uu qoray qaab dhismeedka booliisku waa taliska booliiska oo ka kooban taliye, taliye-xigeen iyo hogaan, markaa side ayuu qobolku u kala hoosaynayaa sideebay caasimadu ukal hoosaynay.

**Qodobka 19aad** waxaa ku qoran in uu taliyuhu ogaysiiyo wasiirka sidaa maahee waa in uu warbixin soo gudbiyaa wasiirka xeerkana waa in loo nidaamiyaa sida ku haboon ee ugu wanaag san waan mahad san tihiin .

4. **Md. Aadan Xaaji Diiriye Dirir**:- Marka hore waxaan taageerayaa doodii C/raxman oo ah xeerku inuu yeesho mabaadiida guud markaan si caama uga hadlo aad moodayso in ay wax ka dhiman yihiin hanashada ama haynta da,yarta waxaad moodaa in aan waxba laga darin dhalinyarada iyo haweenku kuma muujisna, askariga ama ciidanka booliska ah ee ka hawlga markaa waxaa haboon in xeerka ku cadaato cid uu amarka ka qaadanayo se haduu wax gaysto yaa loo raacayaa waa in si cad u qeexnaato xeerka oo ninka booliska ah ee halkaa joogaa waa in uu yeesha astaan muujinaysa awooda uu leeyahay, waxaa kale oo aan cadayn waxayaalaha la xidhiidha qabasha xidhida kumana cayina xeerkan.

   Waxaa kale oo xeerkeena ka muuqata kalmada gaf iyo danbi ma siu macnaa mise waa kale macne waxaanay xeerka ugu jirtaa si isu mano ah markaa waa in la kal qeeqaa oo lagu daraa eay bixin ayaa soo jeedi lanaa, iyada oo loo eegayo shurruucda inoo yaala oo lala eego

   Waxaa jira wax yaabo ninka booliska ka reeban nin booliska oo aan halkan ku cadayn iska qabasho ama baadhis aan sharci ahan iyo ku xad gudubka xaquuqda aadamaha waa in lagu cadeeyaa xeerka, waxaa kale oo loo bahan yahay in ninka booliska ah oo arkaya falkii oo dhacaya ninka iska indho tira waa in wax laga qabtaa oo halka lagu cadeeyaa oo loo eego xeerka ansha marinta waa in ay ku cadaataa xeerkan.

   **Qodobka 1aad** waa in lagu daraa eray bixinta labaddii eray ee aan soo xusay oo la cadeeyaa in lakala saaro labadaa eray waxaa kale oo haboon

in lagu daro labada gudi ee xeerka ku jirta sida Gudidda cabashooyinka iyo oo aan u fahmay in ay tahay mid ka dhex shaqaysa booliiska gudihiisa iyo gudidda cabashooyinka ka dhan ka booliska waa in lagu daraa eray bixinta xeerka.

Xeerka **Qodobka 6aad F/1aad** ha la saxo, **f/2aad** waa inlaga badalaa hirgalinta oo halaga dhigo ilaalinta dastuurka JSL oo halaga masoxo kalmadaa.

**Qodobka 13aad f/2aad** gudidan la samaynayo yaa masuul ka noqonaya hadii labada xubnood ee golaheena fasax noqdaan yaa badalaya. Ma waxay noqonayaa gudiddani gudi dhaqaale qaadanaysa mise waa kuwo bilaadh ku shaqaynaya, se xalaal manoqonaysaa, dhanka kale labada qof eek u shaqaynaya magaca qareenayda ma ogolaanayaa in ay bilaash ku shaqeen, markaa waxaan odhan lahaa qodonkaa aad halooga fiirsado.

**Qodobka 14aad F/7aad** Halkaa wakiilnimada ayaa ku haboon laga dhigay igmashada oo afsomaliga la habeeyo. Ila **F/9aad** waxaan ku daray xidhiidhka booliska caalamiga ah iyo cidii kale ee heshiis lala galo hana lamuujiyo wixii dawladu heshiis laqasho dawladaha caalamiga ah.

**Isla qodonka 14aad** waxaa ku jirtay **F/12aad** nuqulkii hore oo odhanaysa waxaa uu qabanayo iyo wixii xeerarkale jideeyeen waa laga saray xeerkan hada e waxaanan soo jeedinayaa in farqadaa xeerka lagu soo diro sobabta oo ah waxaa uu xanbaarsan yahay ka hawlgalka wax badan oo ay ka mid yihiin cashuura, liisana iyo qabashada mukhaadaraadka iyo kootarabaanka ayuu sahlayaa.

**Qodobka 15aad** waxaan ku soo daray farqad kale oo **F/7aad**

**Qodobka 16aad** cinwaankiisa halka xilka saran waxaan ku badalay ama aan ka dhigi lahaa “Xill-gudashada”

**Qodobka17aad F/8aad** ha la soo raro oo ha la raaciyo **Qodobka 18aad** ee nuqulka cusub ayaa raacin lahaa ee Ah anshax marinta halkaa ayay ku haboontahay isla qodonka waxaa haboon in la kal saar labada Ereyga Gaf iyo Dambi oo **qodobada 18aad iyo 17aad** ku soo noqnoqnayaa iyana waa in midba halkay ku haboontahay la galiyo waana in la kal soocaa oo midiba halka ay ku hoboontahay la geeyaa.

**Qodanka 24aad f/6aad** halka ay ku taalo Guno gunadaasi waa mid soconaysa maxay noqonaysaa, waxaa kaga haboon Abaal marin ayaa ka haboon

**Qodobka 25aad** qodobka hala soo akhriyo Xeerkii abaabulkasaarka oo halala soo akhriyo waxaanu la xidhiidhayay xaqsiinta naafada inta ayay naan ansixina kaa hala eego.

**Qodobka 26aad** ee ah hawl galinta ciidan booliska waxaan leeyahay afsomali ahaan ha la soxo habka uu u dhigan yahay.

**Qodobka 32aad F/2aad** ee ah diwaan galinta hantida booliska waa in xeerka lagu soo daraa hantida guurtada ah ee ay ka mid yihiin baaskooladaha iyo gadiidka oo aan is leeyahay way ka maqan tahay ayaan soo jeedin lahaa in lagui daro waayo waa hanta ciidan waanad mahad san tihiin hawlahana alle ha inoo fududeeyo.

***Maalintii Labaad ee Doodu sii socotey 10:23 AM***

5. **Md. Xasan Cawaale Caynaan:-** Shir-gudoonka, Mudanayaasha iyo Martida sharafta leh waan idin salaamaya, hadaan Xeerka xoogaa ka taabto waxaan marka hore taaageerayaa Gudidda soo habeysay xeerka oo aan u mahadnaqayaa.

**Qodobka 7aad** wuxuu odhanaya Xarunta Ciidanka Bileysku waa Caasimada Somaliland, Markaa Halkaa waxay ka tageen “Hargeysa” waa in lagu daraa

Waxaan soo jeedinyaa sida ku cad Xeer L/r 23 ee Gobolada iyo Degmooyinka“ taliyaha Ciidanka Saldhiga Bileysku wuxuu hoostagayaa oo amarka ka qaadanayaa Gudoomiya degmada” Markaa waa in lagu soo daraa Xeerka oo iyana sidaa laga dhigaa.

Waxaan kaloo ku soo darayaa xeerka “booliiska waxaa ku waajiba inay toos u fuliyaan qaraarka ka soo baxa Garsoorka”

**Qodobkale ee aan ku soo darilahaa** waxa weeye waxaa booliiska ku jira Haween markaa waxaan odhan lahaa “haweenku waa inay maalintii oo kaliya shaqeeyaan waayo waa hooyo oo habeenkii ma shaqeyn karto” markay umulayaan waa in fasax la siiyaa oo xeerka lagu soo daraa, oo mudo 8 bilood fasaxa la siiyaa”.

***Waxaan soo jeedinayaa:-***

- Gudidu aad bay u soo shaqeeyeen Marka Xeerka soo jeedinta Mudanayaasha halala soo eego markaa la ansixiyo.

6. **Md. C/raxman Cismaan Caalim:-** anigu si guud baan isugu dayaya xeerkan, waxaan u arkaa inuu yahay Xeer muhiima oo xasaasiya, bulshadana qiimo weyn ugu fadhiya oo ay tahay in siweyn looga fakaro.

   Marka ugu horeysaa sida **Qodobka 3aad F/4aad** oo sheegeysa in booliiska Somaliland loo tababaro loona habeeyo qaab Bileys rayida (civil police) runtii ma jirto Xeerka meel kale oo ay ku jirto, markaa sida Xildhibaanadii iga horeeyay sheegeen waxaa loo baahanyahay in xeerka Mabaadiidisa waxa laga badalo oo inta dib loo habeeyo lagu soo daro "**Mabaadiida iyo ujeedadiisa nooca bileyska aynu dooneyno"** markaa waa inaan marka hore qaadanaa nooca booliiska aynu dooneyno, caalamka bileyska waxaa loo qeybiyaa State Police, Community Police, Civic Police, booliiska iminka inoo jira waa booliis ay xukuumadu leedahay oo (State Police), Markaa taas ayay ka soo baxaysaa nooca bileyska aynu dooneyno Mabaadiidsa inay xeerkan ku asaasno.

   Waxaa kale u baahanahay in ciidanka booliisku noqon midaan loo adeegsan siyaasda, oo uu noqdo mid ka madaxbanaan Siyaasada oo aan loo adeegsan, ee uu noqdo mid masuul ka ah Nabadgalyada oo kaliya, iminka waxaa la ii sheegayay daraasada la sameeyay oo ay ka soo baxday shaqooyinka iminka booliisku qabtaa aanay ahayn waxaan haqadii booliiska ahayn, markaa waxaan odhan lahaa horta aynu sameyno nooca mabaadiida booliiska aynu dooneyno.

   Wali way inaga leexsantahay nooca bileyska aan dooneyno, wali meynaan arag faldhacay oo nin Sarkaal loo xidhay, waxaynu maqalnaa nin booliisa oo nin diley oo u xidhan magna laga qaato, ***Waa inay xeerka ku cadahay in sarkaalku inuu masuul ka yahay ciidanka uu kaxaysanayo wuxuu geysto.***

   waxaa loo baahanyahay in qaabdhismeedka booliiska lagu cadeeyo noocyada iyo qeybaha booliiska aynu u baanahay sida Booliiska caruurta, iminka qaabdhismeedku wuxuu sheegayaa taliyaha, taliye xigeen iyo askariga taasina maaha qaabdhismeedkii booliiska ee waa qaabdhismeedkii xafiiska, ***Markaa waa in Xeerka ay ku cadaato Qaabdhismeedka Bileyska iyo Noocyada uu noqonayo iyo Shaqooyinka uu kala qabanayo.***

   Mida kale hab-dhaqanka booliiska aynu uga baahanahay waa in xeerka lagu cadeeyaa, ethics hadaan lagu dooran dee maaha booliis oo caaqil kuu keeno

qofka bileys noqonaya, ***markaa waa in xeerkan lagu cadeeyaa recruitment qofka booliiska noqonaya iyo hab-dhaqanka looga baahanyahay.***

Waxaan kaloo is dultaagayaa shilalka dhaca baadhistooda, sida maalintii dhoweyd ee Wargeyska la weeraray, wariyayaal baa la weeraray, guryaa la weeraray, hadii bileyskii sameeyay falka loo diro maxay keenayaan isagii baa dambigii sameeyay, ***Waa in la helaa baadhis madaxbanaan oo ama idaariya oo ka dhex jirta bileyska ama dibada ka ah oo aan u xil qarinayn iyaga, taasina waa inay Xeerkan lagu cadeeyaa.***

Askaringu markuu dambi sameeyo ama cabasho ka timaado waa inaan ninka sarkaalka ah ee saldhigaa jooga, waa inay jirtaa gudi madaxbanaan oo askariga dambigiisa baadha, waayo markasta askariga iyo sarkaal right baa ka dhaxeeyaa, Markaa in Baadhis dhexa loo sameeyaa oo xeerka ka muuqataa, waxaa iyaduna la mida qiimeynta ninka askariga ah waa feylkiisa loo qiimeyo oo gudi loo diro, oo Qiimeynta, Abaalmarinta, iyo dalacsiinta waa in Feylkiisa lagu qiimeeyaa.

***Waxaan iyada ku raacsanahay Cabashooyinka ka dhanka ah booliiska sida Gudidu soo jeedisey,*** Magacaabista Saraakiisha iyo marka askari la qorayo waa inaan reer lagu qiimeyn oo booska reer inuu leeyahay laga dhigine lagu qiimeeyaa wax qabadkiisa.

***Waxan doodeyda ku soo koobayaa:-***

- In Qodobadaa aan kala midka ahay mudanayaasha iyo Gudida lagu soo ururiyo.
- Waxaan kaloo Gudoomiye odhan lahaa siday markii hore ahaan jirtey inaan Gudida Xeerka keentay ee shaqada ku leh aan laga qaadin ilaa uu xeerku inaga gudbayo**.**

7. **Md. Axmed Ducaale Bulaale:-** waan salaamayaa shir-gudoonka iyo Goleweynahaba, runtii intuu inoo yimi xeerkan doodiisa waa lagu celcelinayay waxaan aaminsanahay inuu muhiimad weyn leeyahay waayo wuxuu ka hadlayaa shaqada ugu faraha badan oo ay meelkasta shaqo booliis baa taal, waana wax laga shaqeynayo oo ah nabadgalyada.

   Xeerka aynu sameynaaa markasta waxaa ka maqan siyaasadii uu xeerku ka turjumayay,sida siyaasada xeerkan oo Nabadglayada ka turjumaya, waxa inaga maqan markasta waa siyaasadii hagaysay xeerarka, sida shaqada Wasaarada Arrimaha Gudahana ay tahay inay marwalba ku dabagalaan ciidanka fulinta hawshii.

Sharcigu siduu u fulayo waa in xeerku qeexayaa iyo hay'adaha Nabadgalyada, oo jirtaa cid fulinaysa "law enforcement" gudidu sibay u soo dhigtey, waa inaan xeerka ku qeexnaa in xeerku sharciguu dhigayay sidiisii u fuley, Gudida ay ku soo dareen Gudida xeerka loo saaray waan raacsanahay review bay ku soo magacaabeen, **anigu waxaan qabaa in la magacaabo oo la abuuto gudi functioned oo ka kooban hay'adaha nabadgalyada ah oo ilaalinaysa in xeerku sidiisii u fuley oo bileyskii aan laga horjoogsan Karin in sharcigii fuliyo.**

Waxaa xeerka ka maqan oo aan ku oolin hadii sarkaal booliis ahi wax sameeyo ama tacadi sameeyaan waxa qabanaya iyo sida laga yeelayo, **waa in la sheego sarkaalka bileyska ah ee dadka ku gafa ama askarigaba ku gafa waxa laga yeelayo oo Xeerka lagu soo daro.**

Qaabdhismeedku wuxuu noqonayo iyana waa muhiim, sida Gudidu u soo dhigtey qaabdhismeedka loo baahanyahay way ka weyntahay waa inuu Heer qaran ilaa heer tuulo u dhisanyahay oo qeybo leeyahay maamulkii iyo habki shaqo uu leeyahay. Gudida law enforcementga laftigiisu waa inuu ilaa heer Degmo leeyahay oo aanu Caasimada uun ku koobnaan.

Askariga bileyska ah ee hawlgal ciidan ku dhinta, ku naafooba ama dhibaato ka soo gaadho lagama hadlin, Waxaa kaloo halkan taala oo aan la qeexin askariga caruurtiisa iyo reerkiisii sida loo galayo ileyn hawlgal Qaran buu wax ku noqday, waa halkan lagu qeexaaa in la damaanad qaado askariga reerkisii iyo caruurtisii ilaa ay ka qaangaadhayaan.

Doorka madaxweynuhu yeelanayo xeerka iyana way koobantahay inkastoo Dastuurku sheegayo in Madaxweynuhu Chief commender yahay, iyana way yartahay waxaan odhan lahaa inta wax ka badan ha la siiyo, intaas ayaan ku soo koobayaa, waadmahadsantiin.

8. **Md. Xaashi Xuseen Caabi:-** horta gudida xeerka soo sameysay aad iyo aad baan ugu mahadnaqayaa, anigu waxaan u arkaa xeerkan xeer aan u sameynayno nin taliye ah, waxaynu ognahay marka bileyska la qorayo lama geeyo nin fiican ee waxaa la geeyaa nooca laga caalwaayo, sidaa darted waxaan odhan lahaa horta marka ciidan la qorayo ha la soo celiyo habkii loo qori jirey oo yaana la qorin nin khamriga caba, sigaar caba ama jaad cuna, laakiin ha la doono nin fiican oo akhlaaqdii booliiska la iman kara.

   Waxaa iska badan khaladaadka iyo gefefka ay booliisku geystaan waxa jirta gefaf loo geysto iyaga, waxa jirta dhibaatooyin baan oo aan xeerkan ku xusneyn waxna aan lagaga soo darin.

**Waxaan soo jeedin lahaa:-**

- Waa inaan helnaa Xeer ay ku jiraan wixii qaban lahaa bileyska oo shaqadoodii iyo waajibaadkooda qaabdhismeed leh oo xeerkan laga helaa.

9. **Md. Maxamuud Axmed Obsiiyo:-** shir-dudoonka, Xildibaanada, Saxaafada iyo martida waxaan ku salaamayaa Salaanta islaamka ASC, marka hore Gudidda Xeerka soo sameysay waan u mahadnaqayaa, Xeerkani wuxuu inoo yimi 16/06/2012 runtii ahmiyada uu leeyahay baa keentay inuu intaa raago, iminka gaba-gabadii buu marayaa, waxaan soo jeedinayaa in dooda ka bacdi la ansixiyo.

   Qodobada aan doonayo inaan ka hadlayo waxaa ka mida Qodobka 13aad oo runtii dooda waxbadan ka soo jeediyeen Mudanayaashu, Gudida la sameeyay way fiicantahay laakiin qabyo badan baa ka muuqata, waxaa Xubin laga dhigay Xubin ka mida Golaha wakiilada, Markaa waxaa ka maqa cidii Magacaabaysay, Wakhtiga ay xilka haynayaan iyo Qaabkey u shaqeynayaan ma tabarucbaa mise guno ayay yeelanayaan iyo ma heer Qaran uunbaa mise ilaa Heer Gobol, markaa waa in Qodobkaa la qabyo tiro.

   **Qodobka 14aad F/4aad** ee Gudidu badashay iyagu sidey u dhigeen waa in la saxaa oo laga dhigaa ***"waa in laga dhigaa si waafaqsan Dastuurka iyo Xeerarka dalka".***

   **Qodobka 16aad F/1aad** ee Gudidu ka saartay (i) waa in lagu daayo oo laga dhigo ***"inay fuliyaan go'aamada iyo shuruucda waa faqsan qawaaninta dastuurka iyo dalka"*** runtii waa wax muhiima oo ku jirta meesha, umana banana askariga inuu ku xadgudbo Dastuurka iyo Qawanaaniinta kale, markaa waa in farqadaa sidaa laga dhigaa.

   Ugu dambeyntii **Qodobka 19aad** Gudoomiyuhu waan ku raacsanahay oo wuu ii saxay oo waxaa lagu daray degreeto madaxweyne baa lagu soo saarayaa.

   ***waxaan soo jeedinayaa:-***

   - Ugu dambeyn dooda ka bacdi waa in Xeerka la ansixiyo, Gudida Xeerka soo gudbisaa waa in Xeerka intuu ka baxayo ilaa uu Guurtida ka soo noqdo waa inay Xeerka la socdaan oo wixii laga badaly iyo kaabistaba la socdaan, dooda mudanayaashuna waxaa haboon in wax lagu daro waxna laga badalo, hadal badan waxba tarimaayo.

10. **Md. Jaamac Xasan Aadan:-** Anigu waxaan ku yar darayaa bileyska aan dooneyno inay dhisno waa inuu noqdaa bileys ka duwan bileys dhaqamadii hore oo dhan.

***Gudida Cabashooyinka loo sameeyay waan waafaqsanahay***, laakiin Gudidu ha noqoto mid loo soo gudbin karo cabashooyinka xataa masuuliyiinta laga soo cawday ama taliyaha laga soo cawdey iyana waan in lagu daraa.

Xubno kasta ha noqdeene gudidu awoodooda ma raacsana iyo waxay qaban karayaan, ***markaa waa in la raaciyaa Awooda Gudida Xeerka oo Gudida khaliya oo la sameeyaa waxba tarimeyso.***

Halkan taliyaha iyo Wasiirka waxaad moodaa inay isku dhex jirto marka mid shaqo qabanayo la leeyahay waa inuu la tashadaa Wasiirku, Markaa Hadii uu la tashanwaayo midkood mid muxuu qaban karaa, Markaa waxaan u dhigi lahaa mar haday tahay inay isla tashadaan in laga dhigo "Markuu la tashado"

Askariga Degmada ama Gobolada yaa looga cabanayaa madaama Gudidu Hargeysa lagu soo koobo, askarigii laascaanood joogay ma soo caban karo hadii casimadii lagu daayo gudida, Markaa Gudidda waa in laga dhigaa mid Heer Qaran, Heer Gobol ilaa Heer Degmo.

11. **Md. Maxamuud Jaamac Cilmi (Dable):-** Gudoomiyaha iyo Mudanayashuba way salaamanyihiin, Gudoomiye General M. Gameny wuxu yidhi "ma jiro askari xumiye waxaa jira Sarkaal xun baa jira" aafada ina haysata iyo dhibaatada waxay ka timaadaa Officerka, sharcikasta oo la sameeyaa ma hagaago hadaan ninkii ilaalinayay ahayn mid u hogaansamaya oo ku dhaqmaya hawsha uu ku jiro rule and regulationkeeda.

Distuurka Gudoomiye waa ku taalaa **Qodobka 124aad** sida Ciidanka bileyska masuuliyadiisa iyo wuxuu fulinayo, qaabdhismeedkiisa iyo siduu u shaqeynayo, waxay ahayd sidan Dastuurku sheegayo inay soo sameeyaan Gudidu oo xeerka ku soo daraan taasi waxay xadideysaa waajibaadka bileyska lagu leeyahay iyo waajibaadka Muwaadinka looga baahanyahay, Xuquuqda Muwaadinka iyo waajibkiisa **Qodobka 21aad** ilaa **Qodobka 29aad** ee dastuurka ayay ku jirtaa xabadina Xeerkan ka gama qorna.

Askarigu wuxuu doono ayuu ku sameynayaa muwaadinka oo garanmaayo xuquuqdaa iyo waajibaadka qofku ku leeyahay, sarkaalkuna ma akhrisan oo isna waa sidaa, sharcigu ma qaanuunbaa, ma regulationbaa kuma kala qorna halkan, hadii uu yahay qaanuun ciqaabtii kuma jirto, halkan waa in lagu soo daraa si uu sharci u noqdo waxaas oo dhami isagay ku jiraan, waxan ay gudidu ku soo dartey waa wixii aan hore u jiri jirin ee Argagaxisada iyo budhcad badeedka, darajaa la bixiyay halkan waxba lagagama soo darin waa inay halkan ku soo sawiraan darajooyinka oo sharcigan ay ku jiraan, si loogu sharciyeeyo oo ay u noqoto rages wadanku leeyahay.

Xushmada iyo maamuuska waxaa leh saddexda dhardhaar ee wadanku ka koobanyahay halkan kalmad baa kaga jirta ah maamuuska Golayaasha oo kaliya waana structure dhan, derajada waxaa bixinaya genenka commerndarka ilaa isbatooraha, wixii sarkaala waxaa leh xafiiska ciidanka marka lagu soo wareejiyo wasiirka daakhiliga markuu kala taliyo ka dibna madaxweynuhuu u geynayaa, Wasiirku structureka ayuunbuu sameynayaa, hadaba waxaa inaga dhiman in la yidhaahdo waajibaadka taliyaha Ciidanka waa kaa.

Wasiirku waa Siyaasada Guud uun laakiin waajibaadka uu qabanayo waxaa iska leh Taliyaha ciidanka, hay'ad walba sida dastuurku sheegayo iyadaa shaqadeed iyo qawaaniinteeda leh sida **Qodobka 122aad** uu sheegayo.

waxaa u hooseeya aqoonta ninka xildhibaanka ah shahaadada dugsi sare, hadaba waa inay jirtaa oo xeerka lagu xadidaa qiyaadadaasi waxa sharci ah inay haystaan oo ah darajo jaamacadeed, waa waajib inuu haysto darajo aqoon jaamacadeed oo Ciidamada ah oo lagu xidhaa, waxaa kaloo jira ninka booliiska ah ID card malaha adiga wuu ku joojinayaa hadaad tiraahdo adigu keen malaha, dambiga waxaa iska leh taliyayaasha, sidaa darted waa inay taliyayaashu u dhameystiraan sida dareyska oo kale ID cardka, oo IDcardku noqdaa mid leh **"Magaca oo saddexan, Magaca Hooyada, ID no, Blood Group iyo Qaybtuu ka tirsanyahay".**

Waxaa kaloo jira nin mucaarad dawlada ku ah baa loo soo dhacayaa yaa ka masuula, waa inuu yidhaahdaa askariga waxbaadhayaa anigu waxaan wataa waarankii wataa markaas waa la ixtiraamayaa, meesha waxa ka maqan waa

asaaskii nabadgalyada, waxaa kaloo dhacda in Rasaas nool dadkii lagu rido khaladkeeda askarigu malaha officerkaa ayaa leh dambiga, waa in aan rasaas nool dadka loo isticmaalin oo Xeerkan lagu daraa **oo Rasaasta nool ha lagu badalo rasaasta rabadhka ah**, askarigana marka dhibooga la soo saarayo loo sheega Xuquuqda iyo wajibaadka asaasiga ah oo loo akhriyaa.

Arrinka kale ee jiraa waxa weeye qof baa la qabanayaa waa la dilayaa oo disable baa laga dhigayaa, masuuliyada cida leh ee amarkaa bixisay markuu Maxkamada tago xaq wuxuu u leeyahay in xuquuqdiisa loo jaro.

Bileysku si uu u hagaago inamada aqoonta leh ee baxsanaya ee tahriibiya maxaa qeybti cilmiga ah loo siin la'yahay waxaa looga bahanyahay traffikadii, waxaa looga baahanyahah baadhistii iyo xuuraankii waa inay structurekooda ku soo darsadaan oo ay muhiimad siiyaan Cilmiga aqoonta.

Gudidu iyo bileysku ku darsadaan qayb anshaxa bileyskarygu way leeyihiin qeyb military bileys ah ah oo military, tan kale bileyska iyo shacbigu way isu khidmadeeyaan inagu waxaynu u aragnaa bileyska iyo shacabka inaan cilaqad ka dhaxeysa, Gudidan la sameynayay waa in waajibaadkooda ay ka mid noqotaa in cilaqadkaas wax ka qabtaa, waliba intaas oo kaliya maahee waa inay galaan saldhigyada oo dhibaatada dadka inta badan aan maxkamada la horgeyn ay horgeeyaan si xaqooda u helaan, waayo dad sanado badan iskaga xidhnaa baa jira.

Kalmada Maamuuska ee aan sheegay inay halkan ku qoran tahay, waa in lagu soo daraa Qodob ah in Qofka markuu waardiye yahay uu weydiiyo ID Cardkooda oo haduu qofku diido loo sheegaa inuu fal dambiyeed ku jiro 6 bilooda oo Qodobka xeerka lagu soo daraa.

Gudoomiye dastuurka waxaa ku jira **Qodobka 114aad** oo sheegayaa in ciidamu leeyihiin sharciyad gooniya oo maxaakima markaa waxay soo qoronayaan bileysku ay ku soo referencegareeyaan sharciga Dastuurka oo ku soo cadeeyaan, waxaan u soo jeedinayaan in bileyska sameystaan hotline oo wixii jira laga soo wargalin karo taasina waxay hagaajinaysaa cilaaqaadka shacabka iyo iyaga, sidoo kale waa inay xaafadaha ka sameystaan Community police.

Tayaynta waxaa ka horeeya tirakoobka waa qodob isna xeerka ka maqan, waa inaad ogaataa awoodaad ciidan si aad u hesho wixii information ah, inaga itoobiya waa inuu jiraa network information isku xidha inaga iyo dawladaha jaarka ah iyo amaankaba oo lagu soo daraa xeerka.

12. **Md. Saleeban Cawad Cali:-** Marka u horeysa waxaan u mahadnaqayaa Gudidii ka soo shaqeysay Xeerka aad iyo aad waxaa isaga xilqaamay Gudoomiyaha Siciid Cilmi Rooble, Xeerarku markay siday oo kale xasaasi u yihiin oo naftii dadka iyo waxyaabo badan ku xidhanyihiin waa in aad iyo aad looga baaraan dego siyaasadna shaqo kuma laha, waxaa aniga ii muuqata inuu xeerku u baahanyahay in aad looga baraan dego oo Gudidii arrimaha Gudaha ama aan loo saarin adhoc committee madaama maskaxo badan uu u baahanyahay in dhowr iyo toban Gudida la gaadhsiiyo.

**Qodobka 1aad** Ereyga bixinta lagu soo daray ee ah Sarkaal taas waxaan filayaa inaanay waafaqsanayn termonolgyga askarta si guud iyo si caalamiya ahba, "Sarkaal" waxaan soo jeedin lahaa in lagu qeexo **"Xidigle iyo wixii ka sareeya laga dhigo" Askarina"** loogu yeedho **"waxaa loola jeedaa wixii ka hooseeya sarkaal".**

Waxaa Xeerka ka maqan oo iyana loo bahanyahay Qodob ka hadlaya anshaxa askariga iyo saraakiisha markay shaqo ku jiraa, waxaad markasta aragtaan askarigii oo qayilaya ama sigaar cabaya isagoo shaqo ku jira, markaa waa in lagu soo daro Qodobo ka hadlaya anshaxa shaqada markay ku jiraan shaqada askartu waxyaabaha looga bahanyahay iyo waxyaabaha ka reeban oo aad loogu baahanyahay oo waliba ha lagu daro **Qodobka 11aad** ee anshaxa ka sheekaynaya.

**Qodobka 12aad** wuxuu u dhignaa markii hore inuu awood badan siinayo Wasiirka Arrimaha Gudaha, Wax ka badalkana in Wasiirku aan wax awooda kulahayn, waxaa aniga ii muuqata in sidii hore ka wanaagsantahay sidan Gudidu u soo dhigtey, sababtoo ah aminga ninkii fulinayay ee Masuulka ahayd waa Wasaarada Arrimaha Gudaha, Askartii iyo Wasiirkiina waxaa muuqata in aanay isla haysan oo uu Wasiirkii ka fogaado, waa inuu xogogaal badan ku leeyahay, Markaa waxay Wiiqeysa Wadashaqeyntii Ciidanka iyo Wasaaradii Qaranka uga masuulka ahayd.

Askariga iyo falka uu geysto dambigiisii iyo wuxuu geysto waxaa la saarayaa reerka, markaa waxay noqoneysaa askarigii in hawshii la doonayay aanu fulin, sidaa darted waxaan soo jeedin lahaa ***wuxuu***

***geysto askariga ciidanka isagoo shaqo qaran ku jira la saaro Xukuumada markaa jirta sidaasayna qaranimadu ku jirtaa, oo inta la qodobeeyo lagu soo daro isna Qodobka Caynkaasa.***

**Qodobkaee 13aad** Gudidu wax ka soo badashay oo Gudi loo sameeyay Cabashada Ciidanka ka dhanka ah oo ku jiraan Xubin Golaha Wakiilada ah waa Gudi Heer Qarana Gudidaasi, waa inay jirtaa iyana Gudi heer Gobol iyo aan Gudidaa lagu deyn, Heer Gobol, waxaa sharciga baal marsan arrinta Badhan ka dhacda Hargeysa Gudi joogta ha gasho, Markaa Gudidan Waa Heer Qaran waana Markay arrintu Heer Gobol soo dhaafto, markaa waa in lagu daraa Gudi Heer Gobol ah oo kooban Maayorka, Badhasaabka, Xubin Culimada ah iyo Saraakiisha Ciidamada Gobolka oo caynkaa laga dhigaa.

**Qodobka 14aad** wax kabadalka Gudida ayaan taageersanahay marka laga reebo **F/2aad** oo aan Ereyga "Dadka" aan ku badali lahaa **"Muwaadiniinta"** oo aan ka dhigeysa Farqada ***"Baadhista iyo ilaalinta nafta iyo hantida Guud iyo ta gaar ahaaneed ee Muwaadiniinta"*** waayo ereyga dadku waa afsuuqi lagu hadlo.

**F/3aad** fulinta ilaalinta sharciga hay'ado gaara ku shaqo leh oo ah maxkamadaha, Markaa Farqadaa waa in laga saaro, ama ha laga dhigo ***"ilaalinta iyo fulinta Qaraarada ka soo baxa Maxkamadaha Dalka"***

**Qodobka 15aad** isna Sida Gudida ayaan taageersanahay marka laga reebo **F/4aad** Farqadaasi meelo badan in laga eego ayay u baahan tahay, horta ereyga Nabadgalinayaan waxaan ku badali lahaa **"Badbaadinayaan"**, isna ma xadidna ereyga **"maal"** waa in meesha laga saaro oo ha loo daayo waayo qofku $10 buu u dhimanaya bay noqonaysaa waa in loo daayo oo kaliya **"Nafta"**, sidoo kale ha laga saaro **"haday la ahaato xaalad u baahan inay is daafacaan"** askarigu inuu isdifaaco oo iska difaaco dadkii u shaqeynayay ma fiicna, markaa qodobka dib-uhabeyn ha lagu sameeyo oo aad loo eego.

**Qodobada 16aad iyo 17aad** iyadoo gudidu aad ugu mahadsan, saddex qodob ayaan halkaa ku so dari lahaa oo mid yahay "**adeegsiga Hubka iyo rasaasdta nool Goorma la adeegsan karaa"** Qodob ka hadlaya in lagu soo daro**,** haday tahay mid laga hortagayo mudaharaad iyo

rabshado, iyo qodobka ku xiga oo ah "**maxaa loo adeegsanayaa hadii dhalinyaro oo kale rabshado sameeyaan"**.

sidoo kale waxaan kaloo ku so dari lahaa oo **Qodob 18aad** oo odhonaya **"dayacaada (negligence)'** markaa qodobkaana in wax laga yidhaahdo ayaan soo jeedinayaa, tusaale nin dhaawaca hadii aan dhakhtarkii la gaadhsiin oo saldhiga lagu hayo halkaa dayacaad baa imanaysa, Markaa madaama qofka in la badbaadiyo xaq u leeyahay waa in xeerku wax ka yidhaahdo haday timaado dayacaadaasi oo qofkii saldhiga lagu hayo isago dhiigbaxaya.

**Qodobka 19aad** ee gudidu keentay sidiisa ayaan ku raacsanahay laakiin waxaan dib u eegayaa *F/3aad oo leh "xubinkasta oo ku sifawda faqrad 1aad ee Qodobkan waxaa lagu ciqaabayaa xadhig gaadhaya 10 ilaa 25 sano" waxaan ku dari lahaa* **"inuu magdhawo khasaaraha uu soo gaadhsiiyo Muwaadinka"**

Waxaan kaloo ku darilahaa waxaa jira erey sharciyeed, tusaale ahaan **Cutubka 6aad Qodobka 20aad F/7aad** ee marka laga hadlayo qaabdhismeedka Ciidanka odhanaya "waxaa la dhisayaa" taasina waa khalad waa in laga dhigaa "waa in la dhisaa

13. **Md. Ibrahim Jaamac Cali (Reyte):-** Gudoomiyaha, Xildhibaanada Golaha iyo Martida sharafta leh intaba waan salaamayaa, ugu horeyn waxaan doonayaa inaan laba erey ka idhaahdo Xeerkan booliiska oo labaatan sano ay inagu qaadatay inaynu sameyno, waana xeerarka ugu horeya marka laga hadlayo state, waase nasiib wanaag mar hadeynu gacanta ku hayno, bulsho kasta wuxuu u baahanyahay siduu qaran u noqdo inuu ilaashado sharciga, kala dambeynta iyo ka hortaga dambiyada, taasina waxay u baahantahay in cid gaara awood loo siiyo inay wax qabtaan arrimahaas, cidaasina waa Bileyska.

    Awoodaha aynu siinayno waxaynu ka soo jarney xoriyaadkeenii oo bileyska awoodo uga dhigney, marka laga hadlayo arrimahan waxaa haboon in la isbarbar wado awooda bileyska iyo xoriyaadka asaasiga ah ee dadka, labadaasi ma kala hadhaan marna, marka aynu xeerka ka doodeyno waa inaan niyada ku haynaa arrimahaas, Xeerkana anigoo aad ugu bogaadinaya Gudidda siday wax uga soo badaleen.

Xeerku maaha xeer booliiska ka yimi ee Wa Xeer Wasaaradeed ka yimi Wasaarada Arrimaha Gudaha, Waxaan qabaa inaanu xeerkani ahayn mid dhameystiran oo koobaya arrimihii loo baahnaa inkastoo gudidu dedaashay, hadaad eegto afsomaliga uu ku qoranyahay waa mid saafiya oo caadiya, wuxuu u baahanyahay in afsharci loo eego.

Dastuurka lalama akhriyin Xeerkan Qodobada Muhiimka ah ee u baahan in dastuurka lala akhriyo waxaa ka mida **Qodobka 10aad** oo waajibinaya in international lawska raacno, sidoo kale **Qodobada 26,27,29,30 iyo 35aad** oo gidigood saameya Xoriyaadka qofka muwaadinka ah, sidoo kale waa inay is haystaan xeerka Ciqaabta isna.

**Qodobka 3aad** waa inuu noqdaa Mabaadiida hageysa Xeerka princeble, xeerkani wuxuu u baahanyahay mabaadiida xeerka haygaysa

Waxaa ka mida mabaadiida Xeerkan lagu asaasayo

- **Madax baanaanida iyo dhex dheednimada booliiska:-** xeerkan qobadiisa waa inay u adeegaan oo uu hubiyaa booliisu inuu madaxbanaan yahay, isla markaana dhexdhexaad yahay waa mabda'a kowaad ee bileyska.
- **Baahinta awooda iyo fidinta maamulka ciidanka bileyska "Centralization":-** waa in booliiska lagu saleeyo mabda'aas, iminka bileyskeenu wuxuu u habeeysan yahay sida militeryga oo waxba kagama duwana, in Gobolkasta uu bileysku hoos yimaado Maamulka Gobolada ee Badhansaabada iyo Maayarada.
- **Daah-furnaan iyo la xisaabtan: -** si bileyska iyo xeerkaniba u noqdaan ku taaba qaada waa in la helaa daah-furnaan iyo la xisaabtan oo bileyska go'aamadiisu iyo waxqabadkiisuba muuqdaan weeye, la xisaabtana waa inuu jira.
- **in la qiyaasi karo waxqabadka iyo tayada Ciidanka Bileyska:-**

Qodobkasta ama farqadkasta oo u adeegi karta mabaadiida Booliiska

Booliiska marka uu guri baadhayo waxa uu baadhayo waa inay cayimantahay, xeerkani waa inuu ka jawaabaa

Gudidani waa inay ka koobnaato Xuquuqal insaanka, Sharci-dejinta, hay'adda Garsoorka, oo aanay meelna ka soo galin

Waxaan kaloo jeclahay in lagu kordhiyo Xeerka oo aan hal qodob ahayn ee ah Cutub dhan,

Dadka civilianka ah ee wax ka soo gaadhaan bileyska waxaan qabaa inaan dawlada guud la dacweyn ee la dacweeyo iyaga oo miisaaniyadooda laga jaro,

**Gudoomiye Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Xeerkani qabyo badan ka muuqato oo aanan ku degdegin, markaa waa in Gudi Adhock ah loo diro oo ay soo tafatirto.

14. **Md. Axmed Ibrahim Daahir: -** waxaan taageersanahay Soo jeedinta Md. Rayte ee ah in xeerka dib loogu noqdo oo uu waxbadan u baahanyahay laguna degdegin ee akhris 2aad iyo 3aad ba lagu sameeyo, waayo waa xeer muhiima oo aad loogu baahanyahay.

    Bileysku yaanu noqon mid dadka isagu cuna ee waa inuu noqdaa mid isagu dadka u adeega, Bileysku waa inuu qeybo kala duwan yeesho oo qaab-dhismeedka loo baahanyahay in lagu cayimo, structureku waa divisions uu kala yeesho bileysku ee maaha kala sareynta, tan kale sida Dastuurka ku taal bileyska waxay ahayd in la daadejiyo maamulkiisa, iminka Counselka hargiesa waa inuu bileyska hoos yimaado kan gobolkuna Badhansaabka hoos yimaado, Maamulka sarena sidiisa u dhisnaado, markaa arrinkaana in wax laga bedelo oo bileysku heer gobol iyo heer qaran yeesho weeye, .

    **Waxaan soo jeedinayaa:-**

    - In xeerkan Akhris 2aad iyo 3aad logu noqdo oo aan lagu degdegin ilaa xeer dhameystiran ka ansixinayno.

15. ***15.* Md. Maxamed X. Xuseen Ciise:-** Xeerku wuxuu ka koobanayahay laba qeybood, doodii labaad ee xeerka ayaa socota, Markaa waxaan soo jeedinayaa in doodan, doodii hore iyo soo jeedintii Guddida ee hore iyo tii dambeba afartaas oo wada socda Xeerka laga soo sameeyaa oo inta la isku soo ururiyo laga soo diyaariyo.

Xeerkan waa Xeerkii bileyska nuqulka horena waxaa soo jeedisay Wasaarada Arrimaha Guddaha, Wasaaradu waxaad moodaa inay leeyihiin Qaab dhismeedka ama habka bileyska aynu doonaynaa waa inuu noqdaa bileys Madaniya, Saraakiisha bileysku waxay qabaan in qaabdhismeedku noqdo mid caadiya ee aanu bileys madaniya ahayn, waa dastuuri in bileysku noqdo mid caadiya, hadhaw labadaasi wax kala duwan bay noqonayaan.

Markaa Ujeedoyinka Xeerka waxaa ka mida in booliiska laga dhigo booliis madainiya markaa waa in la iswaafajiyo Xeerkan iyo kii Guddidu soo gudbisey

**Nuqulka Gudidda Qodobka 1aad "Sarkaal"** waxaa loola jeedaa Xubin aan darajo lahayn weeye, **Qodobka 13aad** ee Gudidda waa in wax lagaga soo daraa Gudidda Xuqaaqal insaanka waana ku raacsanahay Saleeban Bukhaari, tan kale qaabdhismeedka Gudida Heer Qaran ilaa Heer Gobol iyana waan ku raacsanahay, Gunnada iyo sidey u shaqeynayaan waa in lagu cadeeyaa Xeerka.

**Qodobka 16aad** soo jeedinta waa in laga dhigaa xill-gudasha, waxaa laga saaray farqad waxaan jeclahay in sidiisii loo daayo waayo Cutub dhan baa ah laba qodob.

**Qodobka 19aad** ee Xeerka hore ee Gudiduna soo jeedisay waxaa ka maqan shuruudaha lagu soo xulayo taliyaha Ciidanka bileyska, **F/1aad** waa in aqoonta lagu soo xulayo sarkaal ciidanka bileyska ka mid noqonaya ay noqotaa aqoon jaamacadeed oo aan aqoon lagu deyn, darajadiisu waa inay noqotaa mid la yaqaan, waayo aragnimo intaas oo sanadood ah.

Mabaadiida Guud ee bileysk Xeerka waxaan ku raacsanahay Md. Rayte waa in Xeerka marka la qoro ay ka muuqataa oo waxaa ka mida ilaalinta xuquuqan insaanka, dhexdhexaad nimadu waa ka mid markaa sida reyte soo jeediyay ayaan ku raacsanahay.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Xeerkani akhriskii 2aad buu maryaa walina farikama qodna, markaa waxaan odhanayaa Dib-halooceliyo oo Akhris 3aad hala galagiyo, in akhris kale lagu celiyona sharcigu inoo diidimaayo.

**16. Md. Axmed Cabdi Kijandhe:-** laba arrimood ayaan ka hadlayaa:-

- Waxaa xeerka ku taala **Qodobka 3aad F/4aad** in booliiska loo habeeyo qaab madaniya, waxa uu xeerku ka hadlayona maaha in boolisku yahay mid madaniya marka waa contradiction Xeerka Gudihiisa ku jira.
- Marka la leeyahay askarigu markuu doono ayuu hubka isticmaalayaa waa khalad weyn xeerkana wax badan baa ka dhiman oo loopholes badan baa ka muuqata.

***Waxaan soo jeedinayaa:-***

- Booliiska hadaynu dooneyno inaynu civil ka dhigno waa inaan Sameynaa Gudi Wasiirku ka midyahay oo dhowr toban Xubnood, 3 taliye ka midyiin, waxaan taageersanahay in xeerkan mar labaad akhris loogu noqdo.

***Maalintii saddexaad ee Doodu sii socotey 10:23 AM 28/05/2013***

**17. Md. Ibrahim Axmed Haybe:-** Shir-gudoonka, Xildhibaanada iyo saxaafada waan salaamayaa marka hore, meel yar yar baan doonayaa inaan taabto anigu

**Qodobka 1aad** waxaan raacsanahay Xildhibaanadii ku tilmaamay in wixii darajo lehna ee alifle ka sareeya in la yidhaahdo "sarkaal" wixii aan darajo lahayn "askari" buu noqonayaa

**Qodobka 13aad** oo Gudidu badashay labo qodob waxaan ku dari lahaa oo horena loo soo jeediyay in xadido muddada cabashada lagaga soo wajaabo waxaana taageersanahay in 2 asbuuc lagaga soo wajaabo, Gudiduna 2 wiig ku soo dhameyso.

**Qodobka 15aad** oo ah awoodda ciidanka bileyska **Gudidda ayaan ku raacsanahay, F/1aad** waxaan ka bedeli lahaa halka "Cidkasta" ah oo aan ka dhigi lahaa "Cida" si aanay sharciyadu isaga hor iman waa in dadka xisaanada lehna lagu daro sida Xildhibaanada iyo Wasiirada iyo garsoorada oo kale inaanu askarigu xidhi Karin.

**Qodobka 16aad** sida Gudidda waxaan ku dari lahaa qodob had iyo jeer la isku qabsado marka askar hawl loo diro waxaa dhacda inay askarta oo dhan wada hadasho taasi waxay abuurtaa is afgarasho waa iyadoo cid madaxi wadato marka ciidanka hawl loo diro waxaan odhan lahaa cida ciidanka ka masuulka

ah ayaa hadli karta oo kaliya si aan khilaaf uga dhicin askarta iyo hawsha cida loo diray, farqadaas ayaan ku daray.

**Qodobka 18aad F/4 iyo 5aad** iyada meesha waan ka saari lahaa, waayo labadaasi waxay ka hadlayaan xeerka intan wax laga badalin awoodihii xeerku siinayay Wasiirka Arrimaha Gudaha ee cabashooyinka iyo waxaas madaama Guddi loo saaray oo aan raacsanahay, **F/6aad** iyana ma dhameystirna farqasdani oo waxbaa ka dhiman markaa Gudida waxaan odhan lahaa dib halkaa ha u soo eegto.

Waxaa xeerku ku basegareysan yahay Xeernidaamiye aynu nidhii Gudida iyo Wasiirku ha soo sameeyaan markaa maxaynu ku ogaanaynaa inuu waafaqsan yahay xeerka, markaa Xeernidaamiyaha waxaan odhan lahaa Gudidda arrimaha Gudaha ee Goluhu ha hubiyaan inuu waafaqsanyahay Xeerka.

**Qodobka 19aad** halka ***mabnuucida*** waa in loo badalaa **"reebanaanta"** ha laga dhigo, Qodobadaan soo eegay intaasay iga dhanyihiin waad mahadsantihiin.

18. **Md. Axmed Maxamed Nuur:-** hadaan Qodobada Xeerkan Guda galo, **Qodobka 12aad A)** halkaa waxaan filyaa inay ka dhimantahay Ku-xigeenka taliyaha **C)** waxaan halka shaqada ku badalilahaa **agabka** waayo shaqaale civic ah malaha ciidanku

**Qodobka 13aad** sida gudida ayaan ku waafaqsanahay oo waxaan taagerayaa sida ay u dhigtey intaas oo xubnood inay Gudidu noqoto. **Qodobka 14aad F/4aad** halkaa waxaa ka maqan Xeerkan oo waxay noqonaysaa **"si waafaqsan Xeerkan iyo xeerarka kale"**

**Qodobka 15aad F/7aad** baan ku kordhinayaa oo ah **" inaan ciidaku xabad nool u adeegsan Karin dad aan hubeysneyn haday dhacdona Cida amarkaa bixisay ayaa ka masuula" F/6aad** waxaa dhacda mudanayaal marka qofka la xidho hadiiba 48 saacadood maxkamada loo gudbiyo iyadaa dib u xalaaleysa in qofka saldhigii lagu celiyo, waa in maxkamaduhu aanay dib ugu celin saldhigyadii ee ay Jeelkaweyn u gudbiyaan.

Waxaa kaloo dhacda saldhigyada in qof xanuunsaya la xidho oo la iska galiyo markaa waa in OBga qofka markuu xanuunsado waa inuu waydiiyaa qofka Wuxuu xanuun qabo iyana oo waxaas oo dhan Xeerka lagu daraa.

Waa in saldhigga laftiguusu yeesho dhakhaatiir wax baadhi kara oo baadhikara qofka xanuun sheegta ee xanuunsanaya, isla markaana waa in qeyb gooniya saldhiga looga sameeyaa Caruurta ee aan la isku xerayn.

**Qodobka 16aad Xarafka (d)** halkaa waxaan raaciyanayaa xataa hadii hawlgalkaasi sharciga waafaqsanayn oo sarkaalka wataa amar ku bixiya waa in sarkaalkaa sharciga lagu horgeeyaa waayo wuxuu bixiyay amar aan sharciga waafaqsanayn.

**Qodobka 25aad** ee Xeerkan wax ka badalka lagu soo sameeyay, **F/1aad** wuxuu leeyahay "xubinta lagu dilo isagoo waajib qaran gudanaya ama lagu dilo aargoosi ka dhashay gudasha waajibkiisa magtiisa waxaa bixinaya Dawlada iyadoo dambiilaha sharciga la horgeynayo, **F/2aad** waxaa ku qoran " xubinkasta oo ku dhaawacanta, ku naafowda ama dhibaato ka soo gaadho iyadoo gudanaysa waajibkeeda qaran waxaa daawadiisa bixinaysa Dawladda", halkaa waxaa ka maqan **"cida way waxyeelo u geysato xabada ka baxda si saraare ah meeshu hawlgalku ka socday isaga laftigiisa wixii khasaare ka yimaada dawlada ayaa bixineysa ayaan ku soo daray",** Madaama kii xabada ridaya ay xaqiisii sidaa noqdey wixii la saaro waa in xukuumadu bixisaa,

Muddanayaal Ciidankan RRU waxay galeen hawlgalo badan midkastaana wuxuu geystaa khasaare waxaad moodaa in loogu talagalay inay wax dilaan oo aan inay wax badbaadiyaanba loogu talo-galay, waxaan odhan lahaa Xukuumada ciidan fiican baad tababartaane waa inaad dib ugu soo tababartaan siday dadka ula dhaqmi lahaayeen.

19. **Md. Maxamed Saalax Cige:-** shir-gudoonka, Mudanayaasha iyo Martida waan salaamayaa, Waxaan doonayaa inaan si toosa u gudagalo

**Qodobka 1aad** Markaad xeerka gudihiisa eegto waxaa jira erayo badan oo xeerka Gudihiisa lagu qeexin sidoo kale waxaan moodaa in aan lala soo akhriyin Xeerkii Ciqaabta Guud iyo markaa waa in talada lagu daro ama fasiraada lagu daro. Sidoo kale fasiraada ha lagu daro **"Saldhig"Rugbooliis"layli sarkaal iwm"** erreyadaas waxaa lagu qeexay ooh ore ugu jirtey

**Qodobka 3aad** waxaa ku qoran hadafka xeerka oo cinwaan u ah markaa waxaan ku badali lahaa "ujeedada Xeerka" **F/4aad** oo odhanayaysa in booliiska Somaliland loo tababaro qaab booliis rayid ah, Waxa ay ka hor imanaysaa **Qodobka 124aad** ee dastuurka, markaa taana in dastuurka lala eego weeyaan.

Qodobka 5aad waxaa ku qoran oo cinwaan u ah maqaamka guud ee ciidanka bileyska hadaad **f/1aad** akhridona waxaad arkeysaa in halka maqaamka ay ula jeedaan waxa uu yahay booliiska markaa si ay isula jaanqaadan waxaan ku badalaynaa Qeexitaanka Bileyska **Qodobka 6aad F/2aad** marka laga hadlayo

mabaadiida bileyska iyo waxa uu masuul ka yahay waxaan ku badalaynaa halka ay ku taal Hirgalinta kalmada "Fulinta".

**Qodobka 7aad** ee Xarunta Bileyska halka dhexena xarun laguma qeexine waxaa ku qoran taliska markaa halkaasina taliska ayay noqoneysaa.

**Qodobka 12aad** oo ka hadlaya awoodaha Wasaarada arrimaha Guduhu waxaan soo jeedinayaa oo aan raacsanahay Sida Guddidu u soo jeedisay

**Qodobka 13aad** ee Gudidu wax kabalka ku soosameysay halka Gudida Cadaaldaa ku jirto waxaan ku badali lahaa madaama xuquuq laga hadlayo waxaan ku badali lahaa **"komsihanka xuquuqal insaanka" Xaraf (F)** ee labada Qareen ku saabsana waxaan ka dhigi lahaa in hal qareen laga dhigo xubinta labaadna booliiska ayaan ugu dari lahaa.

Sidoo kale **F/3aad** baan ku dari lahaa oo wax meesha looga cabanayo ileyn cid bay anshax marin ku sameynayaane **"Qaraarka Gudidu soo saarto waa in looga cawdo Maxkamada Sare oo ah kama dambeys"**

**Qodobka 14aad** waxaan raacayaa sida gudidu u badashay waxaanse ku dari lahaa **F/6aad** oo ah in la raaco marka ay eedayn ama qabasho sameynayaan raacaan Xeerka Ciqaabta Guud iyo Xeerka Habka Ciqaabta oo ay labadaa waafaqsanyihiin marka samaynayaa dabagal, sidoo kale **F/8aad** waa sidaas oo kale iyagana waa in loo raaco Xeerka Habka Ciqaabta

**Qodobka 15aad** waxaan ku dari lahaa **F/4aad** oo ah inay qaadaan talaabo kasta oo ku gudunayaan waajibaadkooda shaqo in lagu sii daro iyagoo raacay "**Xeerka oo daba laga sii daro"**

**Qodobka 15aad F/1aad (A)"** inay u hogaansadaan xeerkan iyo xeerarka kale ee dalka iyo dastuurka" ayaan ku soo dari lahaa inta kale waan raacsanahay Gudida siday u soo jeedisay. **F/4aad** arrinkaasi meesha kuma jirto waxayna hoos galaysaa F/3aad ee isla qodobkan Waxaan kaloo ku kordhinayaa Farqad kale oo ah F/7aad oo ah "inay qaadaan talaabo kasta oo ku gudan karaan waajibaadkooda shaqo"

**Qodobka 17aad** Farqad kale ayaan ku soo kordhinay waan ku waaqsanahay Guddida **F/8aad** ee ay ka saareen ee ah kan anshaxmarinta, waxaan ku soo kordhinayaa anigu "inaanay galikarin olele siyaasadeed" **Qodobka 18aad ee Gudida ee ku saabsan anshaxmarinta ah F/1aad iyana waa anshaxmarin oo maaha faldamiyeed dhibi ka dhalaneyso.**

**Qodobka 19aad** ee Gudidda ee ka hadlaysa taliyaha la magacaabayo waa inuu ahaado sarkaalka ugu sareeya xaga daraja ciidanka, waa in lagu soo daro farqad sarkaalka ugu sareeya daraja waa inuu noqdaa marka la magacabayo taliyaha, **F/2aad** laga dhigo doorashada qofka oo labadaa shardi la is barkiyo waxaa ka dhiman Iyadoo la raacayo xeerka ciqaabta guud, **F/3aad** waxaan raacinayaa " oo loo raacinayo Faldambiyeedka ka dhasha masuuliyada madaniga ah" wayo waa lagama maarmaan in masuuliyadii madani-nimada in meesha lagu cadeeyo

**Qodobka 28aad** ee dhaarta meesha dheer badan baa ku jirta, inta hore waa sax laakiin inta hadalka ee ah inuu ugu adeego waan ka saari lahaa anigu oo dhaartu inta hore ayay ku dhantahay oo madaama uu sharci ku dhaqmayo inta in dhaar laga dhigo waa dheeraad.

**Qodobka 36aad F/1aad** ee ku saabsan hanta-dhowrka runtii waa talis booliis halka horena waxaan ku soo sheegnay inuu madaxbanaan yahay markaa waxaan soo jeedinayaa in marka uu baadhayo uu haysto Amarka Madaxweynaha" oo uu ilaa hello amarka Madaxweynaha aanu sameyn Karin hantidhowruhu wax baadhisa.

**Qodobka 38aad F/3aad** masuuliyadii dambi iyo tii ciqaata ahayd baa lakala qaaday (in loo raaco Xeerka Ciqaata Guud iyo Xeerka Xeerka Habka ciqaabta) mar hadii uu xafiiska xeer-ilaalinta u soo gudbiyay taas ayaan halkaa ku so kordhin lahaa, Qodobka 41aad waa laga dhigo Qodobo kala duwan.

**Waxaan ku soo gabogabyenayaa:-**

- In xeerkan la soo akhriyo xeerarka kale waa xeer aad u mihiima markaa yaan lagu degdegin mashaakilkiisa oo badan darted.

| Cawad Cali Maxamed | C/risaaq Siciid Ayaanle |
|---|---|
| Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada | Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI |
| ---------------------------------------------- | ---------------------------------------- |